MINNEAPOLIS SCHOOL BASED CLINICS program

# Ogolaashaha Caruurta iyo Iska Diiwaan Gelinta Xarunta
*(Minor Consent – Somali)*

*Ee barnaamijka*
Minneapolis Health Department

## Macluumaadka Ardayga

*** Magaca awoowaha: ________________________________ *Magacaaga: _________________________**

**Magaca Laguugu Yeero: _______________________________ *Lambar Ardayga: ____________**

***Taariikhda Dhalashada: _____________ *Lambarka Bulshada (Social Security): ___________________**

***Jinsiga u dhashay:** ❑ Dhedig ❑ Lab ❑ Isku dhaf ***Nooca jinsiga:** ❑ Dhedig ❑ Lab ❑ Aan midna aheyn

***Sida aad jeceshahay in laguugu yeero:** ❑ Iyada ❑ isaga ❑ Iyaga ❑ Kuwo kale:_________________

*** Cinwaanka uu degan yahay ______________________________ *Magaalada: _________________ Nawaaxiga: _____________**

***LUqadda looga hadlo guriga: ______________________________**

***Qowmiyadda(daha):** ❑ American Indian ❑ Asian ❑ Madow ❑ Hispanic/Latino ❑ Isku Dhaf ❑ Caddaan

***Asalka:** ❑ Hispanic/Latino ❑ Hmong ❑ Non-Hispanic/Latino ❑ Somali ❑ Other African ❑ Kuwo Kale:___________

**Telefoonka Ardayga: ____________________** ❑ Gacanta ❑ Kuwo kale Fariin oraal ah ma laguu soo diri karaa? ❑ Haa ❑ Maya

**Iimeylka ardayga: _______________________________**

**Xarun caafimaad kale oo aad tagto ma jiraa, fadlan ku qor halkan: ____________________________**

***Dugsiga:** ❑ Longfellow ❑ Edison ❑ FAIR ❑ Henry ❑ Roosevelt ❑ South ❑ Southwest ❑ Washburn
❑ Wellstone ❑ Kuwo kale: ____________

**Sidee ayaad ku ogaatay xarumaha caafimaadka ee ka dhex furan dugsiyada?**

❑ Bandhig fasalka ah ❑ Tababare ❑ Facebook ❑ Saaxiib ❑ Waalid ❑ Kalkaalisada Caafiimadka
❑ Bogga SBC ❑ Macalin/Shaqaalaha dugsiga ❑ Twitter ❑ Kuwo Kale:________

## Ceymiska

Adeegga qoyska waa mid la’aan ah haddii uu ardaygu leeyahay ceymis caafimaad iyo haddii kalaba. Ceymiska waxaa biil loogu diraa haddii ay suurogal tahay inuu bixiyo kharashka daryeelka caafimaadka.

*Fadlan mid ka dooro*

❑ **Ma garanayo macluumaadkeyga ceymiska caafimaadka** ❑ **Uma maleynayo in aan leeyahay ceymis caafimaad**

**Ceymiska Gobolka/Ceymiska Caafimaadka Dadweynaha**

❑ Gobolka Minnesota ❑ Blue Cross ❑ UCare ❑ MHP ❑ Health Partners

Lambarka Kooxda: ______________________ Lambarka Ceymiska: __________________

**Ceymiska Gaarka ah**

❑ BlueCross/BlueShield ❑ Health Partners ❑ Medica ❑ Portico ❑ Preferred One ❑ UCare
❑ Kuwa kale: ________________________________________________________

Lambarka Kooxda: ______________________ Lambarka Ceymiska: __________________
Magaca qofka ku qoran ceymiska : ________________________

**Haddii aad leedahay ceymis gaar ah, waxaa suurogal ah in waalidkaa lala socodsiiyo kharashka ceymisku bixiyey. Ma ogoshahay in ceymiska loo diro biilka?**

❑ Haa ❑ Maya

***Waa in aad saxiixdaa bogga dambe*** ➘

# Ogolaashaha Caruurta iyo Iska Diiwaan Gelinta Xarunta

*(Minor Consent – Somali)*



Sharciga MInnesota (shariga 144.341-347) waxa uu ogolaanayaa dadka da'doodu ka yar tahay 18 in ay ogolaan karaan si ay u helaan adeegga uureyda/ka hortagga uurka iyo baaritaanka iyo daaweynta cudurada faafa ee galmoodka lagu kala qaado iyada oo waalidka aan la weydiin ogolaasho.

*Fadlan ku qor xarfaha ugu horeeya magacyadaada si aad u cadeyso  in aad akhrisay oo aad fahamtay jumlad kasta.*

| **Waa waajib dhamaan booqashooyinka xarunta caafimaadka oo dhan** | **Xarfaha ugu horeeya magacaaga** |
|---|---|
| 1. Waxa aan fahmi karaa dhamaan macluumaadka caafimaadka. | |
| 2. Waxa aan ogolaanayaa in la ii fidiyo daryeelka caafimaadka uureyda iyo dhalmada. | |
| 3. Waxaa fursad la ii siiyey fursad la iiga jawaabo su'aalaheyga iyo waxyaabah aan dareenka ka qabo. | |

**Foomkan oo aad saxiixdo waxa aad ogolaaneysaa:**

- Hadalka kor ku xusan waa run waana mid u taagan xaaladeyda.     Macluumaadka halkan ku xusan maanta waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobneyn, hadalka kor ku xusan    Waxa aan codsanayaa oo aan ogolaaday in la ii fidiyo adeegga la xiriira dhalmada.
- Haddii aan leeyahay ceymis caafimaad oo gaar ah ama Caafimaadka Gobolka/Ceymiska Caafimaadka dadweynaha, waxa aan ogolaanayaa in loo gudbiyo macluumaadka la xiriira caafimaadkeyga si biilka loogu diro.
- Ogolaashaha waxa uu dhaqangal  yahay ilaa aad ka gaarto 18 jir ama aad joojiso isticmaalka Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiyada.

_______________________________________

Magaca Ardayga oo sadexan

_______________________________________    __________________

Saxiixa Ardayga    Taariikh

**Fadlan u soo gudbi foomka oo aad buuxisay Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga**.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, fadlan soo booqo www.minneapolismn.gov/sbc ama  la xiriir maamulaha barnaamijka 612--673--5305 ama xarunta caafimaadka ee dugsiga.

Soo booqo bogga Google ee SBC https://sites.google.com/view/minneapolisschoolbasedclinic ama kaamarada ku qabo muuqaalka (QR code).

# La Socodsiinta Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka



**Waa maxay sababta aan u dooneyno in aad saxiixdo foomkan?**

Si aan kuula socodsiino sida macluumaadkaaga caafimaadka loo adeegsanayo, loola wadaagayo iyo sida aad ku heli karto. Marka aan kuu fidino daryeelka caafimaadka, wax badan ayaanu kaa ogaaneynaa. Waxyaabaha aan ogaano qaar ayaa ka mid noqonaya diiwaankaaga caafimaadka iyo diiwaanka bixinta kharashka. Si loo ilaaliyo macluumaadkaaga Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiyadu waxa ay raacayaan sharciyada gobolka iyo kuwa dawladda dhexe. Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka ayaa si faahfaahsan uga hadlaya sharciyadan.

**Yaa arki kara macluumaadka aad nala wadaagto?**

1. Marka aad codsato, ADIGA ayaa dib u eegi kara macluumaadka la xiriira daryeelkaaga.
2. Marka aad codsato, WAALIDKAA waxa ay eegi karaan macluumaadka aad la wadaagto Xarunta Caafimaadka ee Dugsiyada ee daryeelkaaga, marka laga reebo qodobada soo socda:
    a. Haddii ay booqashada xarunta la xiriirtay uur ama xaalad ku saabsan uur, cudurada galmoodka lagu kala qaado, ka hortagga uurka, isticmaalka khamriga iyo maandooriyayaasha.
    b. Waxa aad xaq u leedahay in aad codsan karto in waalidkaa loo diido in ay ogaadaan macluumaadkaaga caafimaadkaaga. Haddii aadan dooneyn in waalidkaa ogaado wax kasta oo ka mid ah macluumadkaaga caafimaadkaaga, waa in codsigaaga qoraal ku soo gudbisaa oo aad ku faahfaahisa sababta aadan u dooneyn in waalidkaa u arkaan macluumaadkaaga caafimaadka oo aad saxiixdaa. Xarantu way fulineysaa codsigaaga aad waalidkaa ugu diiday in ay ogaadaan macluumaadkaaga caafimaadka haddii uu dhakhtarkaagu u arko in ay sidaas ku jirto maslaxadaada. Waxa aad ka codsan kartaa shaqaalaha "Foomka Diidmada Waalidka ee Macluumaadka" si aad u codsato.
3. Shaqaalaha Xarunta caafimaadka ee Dugsiga iyo qandaraaslayaasha oo shaqadoodu waajib kaga dhigeyso in ay ogaadaan.
4. Shaqaalaha kale ee caafimaadka marka ay muhim u tahay in ay daryeel caafimaad kuu fidiyaan.
5. Badbaadada Caruurta iyo ciidanka nabadgelyada marka ay arrintu ku saabsan tahay xadgudub/dayac loo geysto caruurta.
6. Hay'adaha degaanka, gobolka, iyo dawladda federaalka ama hay'adaha caafimaadka waxaay soo gudbin karaan macluumaadka oo la soo koobay si loogu isticmaalo tira koobka iyada oo laga saaray dhamaan macluumaadka lagu aqoonsan karo.
7. Waxaa suurogal ah in aan macluumaadkaaga gudbino si loo ilaaliyo caafimaadkaaga iyo amaanka dadka kale.
8. Qareenka iyo shaqaalaha la shaqeeya haddii ay muhim noqoto.
9. Kuwa kale sida lagu caddeeyey Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka, waxaa ka mid ah halka uu sharcigu waajib ka dhigayo, waxaa ka mid ah saraakiisha heysta ogolaasho maxkamadeed, amar xariga ah, ama amar maxkamadeed.

Macluumaadka lama gaarsiinayo cid kale ama hay'ada iyada oo adiga aan lagaa helin ogolaasho qoraal ah (ama marka ay ku haboon tahay, waalidkaa) Haddii aysan aheyn meelaha sharciga gobolka ama kan federaalku ogol yahay.

Diiwaanka Xarumaha Caafimaadka ee Dugsiga waa kuwo ka baxsan diiwaanka waxbarashada ee dugsiga. Marka aad ka baxdo dugsiga sare, diiwaankaaga meel baa lagu keydinayaa meel xiran sida uu dhigayo sharcigu.

**Waa maxay xuquuqda aad leedahay marka aad nala wadaageyso macluumaadka?**

Waxa aad xaq u leedahay in aad diido in aad noo soo gudbiso maluumaadka aan kaa codsano. Hase yeeshee, diidmada aad diido in aad nala wadaagto taariikhdaada caafimaadka iyo macluumaadka kale waxa ay xadideysaa awoodda aan kuu qaban karno daryeel tayo sare leh taasoo saameyn dadban ku yeelan karta daaweynta ama in aan lagu daaweyn gebi ahaanba.

**Qiritaanka In Lagu Soo Gaarsiiyey Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka**

Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka waxa aad ka heleysaan macluumaad ku saabsan sida xarunta caafimaadku ugu adeegsaneyso macluumaadkaaga daaweyntaada, bixinta kharashka iyo hawlaha xarunta. Ogeysiiska oo waraaq ku daabacan waxa aad ka heli kartaa Xarumaha caafimaadka ee Dugsiyada ama bogeena internetka: https://www2.minneapolismn.gov/government/programs-initiatives/school-based-clinics/forms/.

Waxaa aan cadeynayaa in la i siiyey nuqul ka mid ah Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka ee xarumaha Caafimaadka ee Dugsiyada.

____________________________________

Magaca Ardayga oo sadexan

____________________________________ __________

Saxiixa Ardayga Taariikh